JUQRAAFI : CUTUBKA 7aad : SUAALO&JAWAABO :

1) Tix noocyada sanaacada warshadaha ?

J) #) Warshado qadiimi ah #) Warshado fudud #) warshadaha wax soosaarka #) Warshadaha wax beddelo #) warshadaha casriga ah .

2) Qeex sanaacad warshadeed ?

J) Sanaacada warshadaha waa in maadooyinka caydhiinka ah laga beddelo qaabkoodii dabiiciga ah loona beddelo qaab kale, taa oo faa'iido u leh aadanaha .

3) Sheeg goobaha ugu warshadaha badan dunida ?

J) #) Galbeedka Yurub #) Bariga Ameerika #) Waqooyiga Ruushka #) Koonfur bari Aasiya

4) Tilmaam kaabayaasha warshadaha ?

J) #)Alaabta ceydhiin #)ilaha tamarta #)Helitaanka gaadiid #)Saylad ama suuq #)shaqaale . #) Ra'sal maal .

5) Meeqa ayaa loo qeybiyaa ilaha tamarta ?

J) waxaa loo qeybiyaa laba : #) ilaha tamarta la cusboonaysiinkaro iyo #) ilaha tamarka aan la cusboonaysiinkarin .

6) Waa maxay tamar ?

J) Tamar waa awoodda lagu qabto shaqo ama hawl .

7) Waa maxay gaadiid ?

J) Gaadiid waa daabulidda dadka iyo badeecadaha iyadoo laga qaadaayo meel lana geynaayo meel kale .

8) Sheeg noocyada gaadiidka ?

J) #) Gaadiidka dhulka #) Gaadiidka biyaha #) Gaadiidka Cirka .

9) Sheeg ahmiyadda gaadiidka dhulka ?

J) #) Xawaaraha #) dhib yari #) Khasaaraha daabulidda oo hooseeya .

10) kala sheeg noocyada tamarta la cusboonaysiinkaro iyo kuwa aan la cusboonaysiinkarin ?

J) #) Saliidda #) Dhuxusha #) Gaaska dabiiciga ah iyo #) Yuraaniyamka waa tamarta an la cusboonaysiinkarin .

Halka #)tamarta cadceeda #)tamarta dabeesha #)amarta biyaha #)tamarta bayoomaaska

11) Waa maxay geddis ?

J) Geddis waa badeeco laga soo qaado goobaha wax-soo-saarka lana geeyo goobaha lagu isticmaalo ama suuqyada .

12) caddee ahmiyadda gaadiidka cirka ?

J) #) Ballaarinta xiriirka dhaqaale #) isweydaarsiga ganacsiga .

13) Sheeg wax yaabaha saameynta ku leh dhaqdhaqaaqa gediska ?

J) #) Nooca xiriirka siyaasadeed ee kadhaxeeya dalalka #) Hormarka cilmiga iyo aqoonta #) Nooca tirada wax-soo-saarka .

14) Waa immisa tiirarka geddiska ?

J) Tiirarka geddiska waa laba tiir : #) Kala duwanaanta wax-soo-saarka dalalka iyo #) Wax-soo-saarka dheeriga ah .

15) Sheeg noocyada dalxiiska ?

J) #) Dalxiis caafimaad #) Dalxiis dhaqameed #) Dalxiis madadaalo #) Dalxiis qar-iskatuurnimo ah .

#) Dalxiiska isirka laxariira .

16) Muxuu yahay Dalxiiska ?

J) Waa xaalad bulshada iyo Aadanaha la xariirto oo ku saleysan in qofku uu ka socdaalo halkii uu degganaa una socdaalo meel kale si uu u dego iyadoo ujeedku yahay madadaalo, sahmin, cilmi baaris iyo caafimaad .

17) Sheeg ahmiyadda Dalxiiska ?

J) #) Dalxiiska waxa uu gacan ka geystaa horumarinta dhaqaale ee dalalka #) Dalxiiska wuxuu dakhli soo galiyaa qoysas badan #) Dalxiiska wuxuu gacan ka geystaa isweydaarsiga dhaqamada .

18) Sheeg dalalka ugu horreeya xagga dalxiiska adduunka ?

J) Farance , Italy , Germany , Thailand , Turkey , China , Spain , Mexico , America , Englnad .

19) Sheeg astaamaha gaadiidka biyaha ?

J) #) Kharashaadka gaadiidka badda oo yar marka loo eego gaadiidka kale #) Jiritaanka khadadka maraakiib oo waaweyn ee adduunka #) Xamuulka doomaha iyo maraakiibta oo sarreeya .

20) Sheeg wax yaabaha horumariya dalxiiska ?

J) #) Sameynta shirkado iyo adeegyo laxariira dalxiiska

#) Sare u'kaca heerka nolosha

#) in xoogga la saaro ballaarinta mashaariicda la xariira dalxiiska .

W/Q : Al-ustaad Abayle .